

Xaashida Xaqiiqda COVID-19

Noocyada aqoonsiga la ogol yahay ee balanta talaalka

Marka aad u qalanto [inaad qaadata talaalka COVID-19](#) ee Ohio oo aad [u diyaar garoobayso balanta talaalka ama xarunta caafimaadka](#), waxa aad soo qaadataa aqoonsi la ogol yahay.

Bixiyaha talaalkaagu waxa uu u baahan yahay aqoonsi si uu u xaqiijyo **haybtaada, magacaaga iyo da'daada**. Lagaagama baahna inaad keento cadayn dhalashada ama xaaladaada deganaanshaha. Aqoonsigaaga wali waa la aqbalayaa hadii uu dhacay ama uu yahay gobol ama dal kale.

Hadii aad ugu qalanto talaalka shaqada (sida, shaqaale dugsiga xanaanada caruurta-12 ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka), Gobolka Ohio uma baahna waraaqo dheeraad ah oo cadaynta qalanka ah; laakiin, bixiyayaasha ayaa samaysan kara shaybaadh u gaar ah iyo nidaam la socod si ay u qiimeeyaan u qalanka.

Kahor balanta, waxa aanu ku talinaynaa inaad waydiiso bixiyahaaga si aad u xaqiijiso nooca waraaqaha aad ugu baahan tahay balantaada. Noocyada aqoonsiga la ogol yahay waxay ku qoran yihiin hoos:

- Liisanka darawalka ama aqoonsi sawir leh, iyada oo aan la eegeynin hadii uu dhacay iyo in kale ama meesha aad kasoo jeedo.
- Aqoonsi askariga shaqaynaya/hawl gabay.
- Warbixinta dhakhtar (oo ay ku jiraan duwaanka talaalka).
- Duwaanka tirakoobka.
- Duwaanka korsashada.
- Shahaadada qaadashada dhalashada.
- Shahaadada dhalashada: Duwaanka dhalashada, nuqulka rasmiga ah ama ka la xaqiijiyay.
- Aqoonsiga qunsuliyad ama duwaan gelinta qunsuliyada.
- Baasboorka ama kaadhka baasboorka.
- Shahaadada dhalashada.
- Kaadhka degnaanshaha rasmiga ah.
- Arjiga waraaqaha badalka qaadashada dhalashada/dhalashada.
- Foomamka Waaxda Gobolka.
 - Duwaanka adeegga ciidanka (DD-214)
 - Shahaadada Dhalashada ee Muwaadinka Maraykanka ee Dalka Dibadiisa Ku Dhashay (FS-545)
 - Shahaadada Warbixinta Dhalashada Muwaanka Maraykanka ee Dalka Dibadiisa Ku Dhashay (DS-1350)
 - Warbixinta Qunsuliyada Dhalashada Muwaanka Maraykanka ee Dalka Dibadiisa Ku Dhashay (FS-240)
 - Waraaqaha Ogolaanshaha Shaqada (I-766/EAD)
 - Warqada gaadiidka (I-797F)

Waxaa la sameeyay Febraayo 26, 2021.

Macluumaad dheeraad ah, booqo coronavirus.ohio.gov.

Jawaabaha su'aalaha aad ka qabto COVID-19, wac 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634).

Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu u muhiim yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.